



Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga Su'aalaha badanaa leys weydiyo

Waa maxay Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga waa diiwaanka dugsiga ee nidaamka isqiimeynta. Waxaa la sameeyaa sannad kasta waxayna qayb ka tahay wareega socda ee qiimeynta iyo qorshaha dugsiga.

Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga waxay siisaa macluumaad bulshada dugsiga waxqabadka dugsiga ee barnaamijyada imtixaanka gobol iyo qarankaba. Waxay sidoo kale siisaa macluumaad ku saabsan xaalada macluumaadkaas loo tixgelinayo.

Qiyaastii 2250 dugsii iyo xarumo waxbarasho ayaa soo saara Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga iyadoo loo eegayo waxyaalaha gaarka ah ee ay dejisay NSW Department of Education and Training (DET), Agaasinka Masuuliyada Dugsiga iyo Wasaaradda Waxbarashada ee NSW (Educational Measurement and School Accountability Directorate).

Waa maxay ujeedada Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga waa qayb muhiim ah oo ka mid ah masuuliyada dugsiga ay ka doonayaan waalidiintiisu iyo bulshaduba ee NSW Department of Education and Training (DET) iyo Wasaaradda Waxbarashada, Shaqada iyo Xirriirka Goobta Shaqada ee Dawlada Dhexe (Department of Education, Employment and Workplace Relations) (DEEWR).

Waa maxay warbixinta khasabka ah ee laga doonayo Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Qaybaha khasabka ah ee dugsiyada laga doonayo inay si ballaaran uga warbixiyaan iyagoo daboolaya kuwan soo socda:

- Macluumaadka asalka ah ee ardayga iyo shaqaalaha
- Waxqabadka ardeyga
- Isqiimeynta dugsiga
- Bartilmaameedka la hagaajinayo.

Yaa masuul ka ah horumarinta Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga waxaa diyaariya guddiga isqiimeynta ee dugsiga. Guddigu wuxuu ka sameysan yahay bulshada, wakiilada waalidiinta, macalimiinta iyo xubnaha fulinta maamulka oo hoos imanaya hogaanka Maamulaha.

Miyaa looga baahan yahay dhammaan dugsiyada inay sameeyaan Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Haa. Dhammaan dugsiyada dawlada ee NSW waxaa laga doonayey inay soo saaraan Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga ilaa 1997.

Macluumaad nooc ee ah ayaan rajeynayaa inaan ka akhristo Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga?

Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga waxaa ka mid ah macluumaad ku saabsan:

- Macluumaadka kooban ee shaqaalaha iyo ardeyda
- Natiijada waxqabadka ardeyga ee imtixaanada qaranka iyo gobolka oo dhan, ee labadaba dugsii hoose/dhexe iyo sare
- Halkuu ka gaaray ardeygu ciyaaraha iyo fanka
- Macluumaad la xirriira barnaamijyada muhiimka ah iyo bilowyada ay bixiyaan dugsiyadu
- Isqiimeynta waxqabadka dugsiga iyo horumarka barta la higsanayo; iyo
- Bar tilmaameedka u baahan in la hagaajiyo sannadka soo socda.

Sidee buu yahay Kooxda Dugsigu (Like School Group) (LSG)?

A Like School Group Waa koox dugsigo ah oo isga mid ah laba qodob bulsho oo ay ka mid yihiin:

- Heerka dhaqan dhaqaale celcelis ahaan ee bulshada dugsiga (heer dhaqan dhaqaale ee dugsigu waa cabirka lagu xisaabiyo sannad dugsigeed kasta si uu u muujiyo qaabka isbedelada isqoritaanka)
- Juguraafi ahaan meel go'an ku yaal.

Dhammaan dugsiyada hoose/dhexe, sare iyo dugsiyada bartamaha waxaa lagu meeleeeyey mid ka mid ah sagaal Like School Groups, inay yihiin dugsiga xulashada. Waxaa loo sameeyey Like School Group dheeraad ah dugsiyada xulka ah.

Waxaa laga yaabaa inay dugsiyadu doortaan inay warbixintooda waxqabad ku soo daraan Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga ee la xirriirta waxqabadkooda Like School Group (LSG).

Warbixinta waxqabadka oo la barbardhigayo Like School Group ma ah waxa khasab ah. Waxaa laga yaabaa inay dugsiyadu doortaan inay daabacaan macluumaadkan si ay u muujiyaan waxqabadkii dugsigooda qiimeeyntii gobolka oo dhan marka la barbardhigo dugsiyada kale ee la midka ah Like School Group. Tani waxay noqon kartaa marmarka qaarkood mid xogogaal ah halkii natiijada la barbardhigi lahaa celceliska gobolka.

Shuruuda ah warbixintu ma isku mid baa labadaba dugsiga yar iyo ka ballaaran?

Dugsiyada yar yar ama kooxa ardeyda yar leh, ka warbixinta macluumaadka waa inay waafaqdaa nidaamka macluumaadka shakhsiyeed iyo ka qaarka ahba. tirakoobka kooban ama waxqabadka ardeyga oo lagu muujiyey garaaf waa inaan loo isticmaalin kooxaha ka yar 10 ardey koorsadaas ama maadadaas, meeshii ay jiraan 10 ardey wax ka yar, dugsiyadu waxay uga soo warbixinayaan macluumaadka sidii qoraal sharaxaad leh oo keliya iyagoo siinaya tixgelinta ay mudan tahay hubinta arimaha gaarka ah ee ardeyda oo dhan.

Waa maxay shuruudaha ikhtiyaariga ah ee ka soo warbixinta?

Dugsiyada waxaa la siiyey fursada ah inay ku soo daraan macluumaadka la xiriira aqoonsiga waxqabadka heerka sare ah ee ardeyga ee fanka, cayaaraha, wadaninimada iyo meel kasta oo kale oo la khuseysa dugsigiina.

Macluumaadka kooban ee khuseeya barnaamijyada kale ee dugsiga ee la bixiyo waxaa laga yaabaa sidoo kale in lagu soo daro sida samafalka ardeyga, macluumaadka iyo tignoolajiyada isgaarsiinta, waxbarashada degaanka iyo barnaamijyada ardeyda leh baahi dheeraad ah.

Goorma ayaan filaa inay helo nuqul ka Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga ee dugsiga ilmaheya?

Dugsiyadu waxay badanaa soo saaraan Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga inta lagu jiro teeramka 1 iyo 2 ee sannadka ku xigga. Waa shuruud in la qaybiyo Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga 30-ka Juun sannad kasta.

Side baan ku heli karaa nuqulka Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga ilmaheya?

Dugsiyadu waxay siinayaan hal nuqul oo warbixin ah qoys kasta oo carruur ku leh dugsiga. Dugsiyada badan waxay doorteen inay ku bixiyaan si elektaroonik ah Warbixinta Sannadlaha ah ee Dugsiga iyagoo gelinaya warbixinta website ka dugsiga. Fadlan kala xirriir dugsiga ilmahaaga ama Educational Measurement and School Accountability Directorate 9707 6217 wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad ku heli lahayd nuqul.

Adeega Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya si aad ula xirriirto dugsiga ilmahaaga ama Educational Measurement and School Accountability Directorate, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjumaan afkaaga. Turjumaanka ayaa wici doona dugsiga ama Directorate wuxuuna ku jiri doona khadka si uu kaaga caawiyo wadhadalkiina. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

